

OFFICIAL

Dadka degan
2 Henryville Street iyo
152, 154, 156 Inkerman Street
ST KILDA

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo dirayaa inaan kula socodsiiyo halka ay marayaan howlihii dhismeyaalka iyo barnaamijii dib loogu dhisayay saraha dhaadheer ee ay Homes Victoria wadeen.

Marxaladda xigta ayaa hadda hirgelinayaa toddobo goobood oo cusub. Tani waxay ka dhigan tahay inaan wadno sidii aan ugu dhisi lahayn dadka hadda degan guryahaas iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba guryo ka wanaagsan, ka amni fiican isla mar ahaantaasna ka raaxo badan kuwa hada dhisan.

Laguma dhawaaqin maanta in dhismahaaga uu qeyb ka yahay marxalada xigta ee howlaha dib-u-dhiska.

Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028, waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri ku habboon inta ay howlaha dib-u-dhiska socdaan.

Waxaan guryo cusub ka dhiseynaa meel goobta ka ag dhow si aan u taageerno qoysaska dib-u-dejinta loo sameynayo

Guryo cusub oo tayo leh ayaa durbaba laga bilaabay in laga dhiso meel goobta ka ag dhow si ay uga taageeraan dadka meesha degan fursadaha dib-u-dejinta. Waxaa la filayaa in la dhammaystiro sanadkan waxaana ka mid ah:

- Essex Street, Prahran
- Simmons Street, South Yarra
- Barak Beacon, Port Melbourne
- Holland Court, Flemington

In guryahan la qaboojiyo lana kululeeyo waa ay ka sahlanaan doonaan kuwii hore, dadka ay ku adag tahay dhaqdhaqaaqana way u fududaan doontaa, waxay kaloo lahaan doonaan amni aad u sarreeya, iftiin iyo hawo ay guyaha helayaan intaasna waxaa usii dheer inay leeyihiin balakoono iyo qolal kuu gaar ah oo dharka lagu dhaqdo.

Aragtida fog ee aan ka leenahay xaafaddaada

Bilaha soo socda, waan kula soo xiriiri doonaa si aan u ogaano ra'yigaaga taas oo naga hagi karta qorsheynta degmadaada. Himilada ayaa ah in la bixiyo guryo tayadoodu sarreyso oo laga hirgelinayo xaafad nabdoon, si wanaagsan loo nashqadeeyey isla markaasna leh deris si wanaagsan isugu xiran.

Xog ku saabsan barnaamijka dib-u-dhiska

Saraha dhaadheer ee Melbourne xilliyo hore laga dhisay waxaa lagu beddeli doonaa guryo cusub oo buuxiya heerarka casriga ah ee raaxada, gelitaanka, iyo koronto dhaqaaleynta. Marka dib loo dayactiro dhismeyaalkan, waxaan xaqiijinaynaa in dadka degan guryahaas ay ku noolaan karaan guryo ammaan ah, raaxo leh, oo ku habboon baahidooda hadda taagan iyo tan mustaqbalkaba.

Ma jiri doonto dib-u-dejin loo sameyn doono dadka degan saraha dhaadheer oo bilaaban doonta bisha Janaayo 2028 ka hor.

Nagu xirnoow oo la soco wixii soo kordho

Waan kula soo socodsiin doonaa wixii soo kordha marxalad kasta oo mashruuca ah.

Waxa kale oo aad booqan kartaa websaydkeena homes.vic.gov.au si aad u aragto waxa howlaha aaggaaga ka socda aadna isku diiwaan geliso si aad u hesho wixii war u dambeeyay ee soo kordhay.

Mahadsanid

Simon Newport

Madaxa Fulinta

ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au

